

Su'aalaha Caamka ah ee u saabsan Talaalka



Su'aasha

01



Tallaalku ma yahay mid badbaado ah?

Haa. Malaayiin qofood ayaa si badbaado leh u qaata tallaalka sannad kasta. Dhibaatooyinka soo raaca ee ugu caansan waa kuwo aad u fudud, sida xanuun ama bararka goobta cirbadda laga qaato.

Su'aasha

02



Miyay ka wanaagsan tahay inaad cudur lagu xanuunsado intii tallaalka loo qaadan lahaa?

Maya. Cudurradani waxay noqon karaan kuwo halis ah, gaar ahaan carruurta yaryar, dadka waaweyn, iyo dadka qaba xaalado caafimaad oo dabadheeraada, sida neefta, cudurrada wadnaha ama sonkorowga.

Su'aasha

03



Miyaanay dhammaan cudurradii halista ahaa wada dhammaan? Waa maxay sababta loo sii wado tallaalka?

Haddii aan joojino tallaalka, kiisaska yar ee aan ku hayno gudaha Mareykanka waxay si dhakhso ah u noqon karaan tobanaan ama boqollaal kun oo kiisas.